



Juun 19, 2020

Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta Qaalliga ahoow,

Maanta, Gudoomiyaha gobalka iyo Wasiirka Waxbarashada ayaa ku dhawaaqay [tilmaamaha Dawlada Ontario](#) ee kusaabsan ku laabashada dugsiyada bisha Sibteembar. Gudiyada dugsiyada dhammaan Ontario ayaa laga codsaday inay u diyaar garoobaan sadex qaybood oo suuragal noqon kara kuwaasoo laga eegi doono xaalada caafimaadka dadwaynuhu siday tahay waqtigaas:

- **Jadwalka caadiga ah ee maalinta dugsiga oo wata habraacyada caafimaadka dadwaynaha oo la adkeeyay:** Ardayda ayaa aadaaya dugsiga maalin kasta, ayagoo dhiganaaya fasalo leh xajmiga caadiga ah ee u dagsan fasalada.
- **Jadwalka joogtada ah ee maalinta dugsiga oo wax laga badalay:** Ayadoo lagu salaynaayo talada caafimaadka dadwaynaha, qaabka bixinta adeegga oo la isku raacay ayaa la dajiyay si loo fududeeyo kala fogaanshaha dadka iyo isku imaatinka ardayda. Sida ku cad qaabkaan, gudiyada dugsiga ayaa la waydiisanayaa inay dhawraan xadiga ah 15 arday wax ka badan inaysan galin fasalka caadiga ah markiiba ayna dajiyaan jadwalo u sahlaaya ardayda inay kaliya la joogaan dadka ay isku fasalka yihiin iyo hal macalin dhammaan maalinta dugsiga sida ugu badan ee suuragalka ah. Qaabkaan ayaa u baahan doona maalin gaar ah ama asbuuc gaar ah oo adeeg la siiyo qayb kamid ah fasalka markiiba.
- **Waxbarashada guriga lagu baranaayo:** Haddii la kordhiyo xirnaanshaha dugsiga, ama waalidiinta qaar ay doortaan inaysan ilmahooda ku celin dugsiga, gudiyada dugsiga ayaa u baahan in loo diyaarsho inay baxshaan waxbarashada oonleenka ah. Waxbarashada oonleenka ah waa in lagu baxshaa oonleenka ilaa heerka ugu sareeya ee suuragalka ah, ayna ku jirto abuurista himilooyinka ugu hooseeya ee ardayda si ay xariir toos ah ula yeeshaan macalinkooda waqti iskumid ah si joogto ah, oo sidoo kale loo yaqaano waxbarashada wada jirka ah. Waxbarashada wadajirka ah ayaa loo adeegsan karaa qayb kamid ah casharada fasalka guud, kooxo isku mid ah oo arday ah, iyo/ama casharada qof iyo qofka ah.

TDSB ayaa ka baaraan dagaysay qorshaynaysayna dhammaan arimahaan suuragalka ah dhawrki asbuuc ee lasoo dhaafay waxayna hadda ka shaqaynaysaa samaynta qorshayaal kama danbays ah, oo lagu salaynaayo baaqii maanta soo baxay. Si loo helo caawimaad dheeraad ah xog faahfaahsana looga baxsho qorshayaasheena, TDSB waxay ka codsanaysaa waalidiinta/masuuliyiinta, shaqaalaha iyo ardayda inay nala wadaagaan fikradaha ay ka qabaan qorshaha Sibteembar ayagoo buuxinaaya xog aruurino oonleen ah. Jawaabta muhiimka ah ayaa gacan ka gaysanaysa hagista shaqada TDSB intaan wadno go'aaminta qorshayaasha Sibteembar. Fadlan ka gal Xog aruurinta Waalidka/Masuulka [halkaan](#) halka aad ka helayso Xog aruurinta ardayda Fasalka 7 ilaa 12 [halkaan](#).

Gudiyada ayaa laga codsaday inay u soo gudbiyaan qorshayaashooda Wasaarada Waxbarashada bisha Agoosto 4, 2020 kadibna TDSB ayaa xaqiijinaysa inay qorshayaasha la wadaagto bulshooyinka dugsigyada marka la ansixiyo, kahor biloowga dugsiga. Waxaan doonaynaa inaan xaqiijino in dhammaan ardayda iyo qoysasku ay si fiican u diyaar garoobaan ayna ogyihiin waxa ay tahay inay fishaan markay ku laabanayaan dugsiga bisha Sibteembar.





Sidii caadada ahaydba, waxaan sii wadaynaa inaan idiin soo sheegno wixii xog dheeraad ah oo soo baxa.

Si daacad ah,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "John Malloy".

John Malloy
Agaasimaha Waxbarashada

